



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisa, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Abril 21, 2021

Ku socota: Dhammaan Shaqaalaha iyo Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Xaalada caafimaad oo degdeg ah ee COVID oo ka sii socota dalka oo dhan

Iyada oo sababtu tahay saameynta sii socota ee cudurka baahsan ee COVID-19, Waaxda Caafimaadka Maraykanka iyo Adeegyada Dadweynaha ayaa dib u cusbooneysiisay go'aamintii Janaayo 31, 2020 oo ah in xaalada caafimaad ee degdeg ah ay weli ka sii jirto dalka oo dhan. Tallaabadani waxay ka dhigan tahay in dhammaan wax iska dhaafidii iyo dabacsanaantii HHS/CMS ee hadda jirtaa ay sii socon doonto ilaa laga gaarayo Luulyo 20, 2021, marka laga reebo in Xoghayaha HHS uu ka soo saaro tilmaamo waqti hore lagu joojinayo iyada.

Wixii faahfaahin dheeraad ah, fadlan dib u eeg ku dhawaaqidani:

ku <https://www.phe.gov/emergency/news/healthactions/phe/Pages/COVID-15April2021.aspx>

Kordhinta ku dhawaaqista xaalada degdega ah ee federaalka ayaa oggolaanaya in tallaabooyinka ODDS ay meel marisay ee lagaga jawaabayo cudurka baahsani ay sii jiraan. Tani waxaa ka mid ah oggolaanshaha in waalidiinta carruurta yar yar ay noqdaan Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed (PSW) ama Xirfadlayaasha Taageerada Tooska ah (DSP). Dib u cusbooneysiinta go'aamintu waxay dhaqan galaysaa Abril 21, 2021 waxayna soconaysaa Luulyo 20, 2021.

Fadlan sii wad in aad la socoto tilmaamaha hadda jira ee loogu talagalay cudurka COVID-19.

Waad ku mahadsan tahay wax kasta oo aad sameynayso si aad u xaqiijiso caafimaadka iyo ammaanka.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriiir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.